

Agabka Bulshadda Gobolka New York

Isha Hagaida ee Dadka Muhaajiriinta Reer New York
Janaayo/Fibraayo 2023



Isbahaysaiga Laanta Socdaalka New York waxay samaysay agan si loo siiyo ilo xubnaha bulshadda iyo shuraakadayada iyo gaashaan buurtayada la shaqeeya iyaga. Buugyarah si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa iyadoo lagu salaynayo beddelka sharciyada iyo xeerarka.

Narkii ugu dambaysay ee xogta la cusbooneysiiyay waxay ahayd: 02.16.2023

Tusmadda

- Caafimaadka **3**
- Socdaalka **4**
- Waxbarashadda **7**
- Dimuqraadiyada **8**
- Dhaqaalaha **9**
- Garo Xuquuqdaada **11**
- Dembiyada Nacaybka ah **12**
- Ilaha NYS **13**

Caafimaadka



Ceymiska Caafimaadka

- Isbedel cusub ayaa socda oo wax ka bedelaya dadka heysta ceymiska Medicaid, Child Health Plus, iyo Essential Plan.
- Tan iyo bilowgii 2020, dadka ka diiwaan gshan ceymisyadaas waxaa si toos ah loo kordhinayey ceymiskooda caafimaadka iyada oo la raacayo nidaamka dawladda dhexe ee la xiriira COVID-19.
- Hase yeeshee, sharciyo cusub oo dalwadda federaalka ah ayaa waajib kaga dhigaya gobolka NY inuu dib u bilaabo dib u qiimeynta dib u cusbooneysiinta dadka laga diiwaan geliyo barnaamijyadaas. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in lagaa doonayo in aad buuxiso codsi si dib loogu cusbooneysiyo ceymiskaaga caafimaadka xubnaha qoyskaaga.
- Laga bilaabo xagaaga 2023, ogeysiiska dib u cusbooneysiinta ayaa loo soo dirayaa dadka is diiwaan gelinaya barnaamijyadaas iyo taariikhda is diiwaan gelinta. Ogeysiiska dib u cusbooneysiinta waxaa ku jira taariikhda ugu dambeysta qabashada codsiga iyo khatarta uu leeyahay ceymiska oo kaa dhaca. Taariikhda waa mid ku saleysan dhamaadka taariikhda is diiwaan gelinta taasoo u dhaxeysa 30ka Juun 2023 ilaa 31ka Maajo 2024.
- Si uu Gobolka NY kuugu soo diro digniinta qoraalka ah si aadan u lumin fursadaha muhimka ah ee la xiriira ceymiska caafimaadka, oo ay ka mid tahay marka dib loo eegayo.
 - Fariinta START u soo dir 1-866-988-0327 (afka isbaanishaka, fariintu waa INCIAR)
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, soo booqo info.nystateofhealth.ny.gov/COVID-19-Changes

- Xogtii ugu damebysay ee talaalka xoojiyaha COVID-19 waa diyaar. Xoojiyaha cusub waxaa lagu magacaabaa Dadka reer New York waxa ay ceymiska caafimaadka dawladda iyo kan gaarka ahba ka heli karaan Waaxda Caafimaadka ee NY. Mudada is diiwaan gelinta ee sanadka 2023 waxa ay bilaabatay 16kii Nofeembar 2022.
 - Is diiwaan geli inta ka horeysa 15 bisha si uu ceymiskaagu u bilowdo 1da bisha soo socota. Tusaale ahaan, waa in aad is diiwaangelisaa inta ka horeysa 15 Deceber 2022 si ceymiskaagu u bilwodo 1 Janaayo 2023.
- Sidee la isu diiwaan geliyaa
 - Gargaar is diiwaan gelinta oo lacag ah ayaad codsan kartaa, adiga oo fool ka fool ula kulma ama telefoonka ku codsada. Qof ku caawiya ka raadso info.nystateofhealth.ny.gov/ipanavigatorsitelocations
 - Soo wac adeegga macaamiisha ee Waaxda Caafimaadka ee NY 1-855-355-5777.
 - Barta internetka ee nystateofhealth.ny.gov. Qoraal ayaad kula sheekeysan kartaa adeegga macaamiisha saacadaha ay shaqeeyaan si aad u buuxiso codsiga.
 - Dadka deggan Magaalada New York: soo wac 311, fariin qoraal ah “CoveredNYC” to 877-877, ama soo booqo on.nyc.gov/healthinsurance si lagu caawiyo ama u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Macluumaad ku qoran luqadaha kala duwan waxa aad ka heli kartaa info.nystateofhealth.ny.gov/InformationalMaterials

Hel agab ka baaritan COVID-19 oo guriga oo bilaash ah

- Haddii aad leedahay ceymis caafimaad (ceymiska caafimaadka ee goobta shaqada ama mid aad suuqa ka iibsatay, ama barnaamijyada dawladda sida Medicaid, Medicare, ama CHIP), waxaa lagu ogol yahay ilaa 8 qalabka baaritaanka ah oo lacag la'aan ah.
 - Waxa aad isticmaali kartaa farmashiyaha ama dukaanka ka tirsan “shabakadda” taasoo aad jeebkaaga ka bixineyso \$0 ama lagu celinayo lacagtaad jeebkaaga ka bixiso.

Maanta Is Tallaal

- Tallaalka cudurka COVID-19 waa BILAASH iyadoon loo eegayn xaaladdaada soo galootinimo ama haddii aad caymis caafimaad aad qabto iyo in kale.
- Tallaallada ayaa si baahsan ayaa waxaa looga helaa farmashiyeyaaasha, waaxyada caafimaadka ee maxalliga ah, rugaha caafimaadka, Xarumaha Caafimaadka ee Federaal ahaan u Qalma, iyo meelo kale oo Gobolka New York ku baahsan.
 - Booqo [Vaccines.gov](https://vaccines.gov), ZIP koodkaaga farriin qoraal ahaan ku soo dir 438829, ama wac 1-800-232-0233 (TTY 888-720-7489) si aad ballan uga samaysato meel adiga kuu dhowl.

Nidaam cusub oo gaar u ah dadka u dhashay Kuubba, Haiti, Nicaragua, iyo Venezuela

- DHS waxa ay ku dhawaaqday nidaam cusub oo gaar oo u ogolaanaya dadka ud ahshay Kuuba, Haiti, Nicaragua iyo Venezuela iyo qoysaskooda, ay ku codsan karaan sharciga Mareykanka ee.
- Dadka ka soo baxa shuruudaha ee ku nool dibadda Mareykanka oo aan heysan dokumeenti loo tixgeliyo, iyada oo xaalad kasta gooni loo eegayo, lana siin karo ogolaasho ay ku soo safaan, si ku meel gaar ahna ugu noolaadaan Mareykanka muddo 2 sano ah iyada oo loo eegayo bini'aadnimada.
- Si aad uga qeyb qaadata nidaamkaas, codsadaha waa inuu heystaa qofka dhaqaale ahaan taageeraya Mareykanka. Waa in sidoo kale ay ku gudbaan baaritaanka taariikhda fal dambiyeedka iyo amaanka, kana soo baxaan shuruudaha ku xiran.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkan, fadlan soo booqo uscis.gov/CHNV.


Buuxinta codsiga magangelyada ee barta internetka

- 9Kii Nofeembar 2022 waxa ay USCIS ku dhawaaqday in qaar ka mid ah codsiyada magangelyo doonka ah lagu soo gudbin karo barta internetka Formka I-589, codsiyada Magangelyo doonka ah ee laga joojiyey in Waddanka Laga saaro.
- 23ka Janaayo 2022 waxa ay USCIS ku dhawaaqday in qaar ka mid ah codsiyada magangelyo doonka ah lagu soo gudbin karo barta internetka Formka I-765, codsiyada Ogolaashaha Shaqada.
- Ku soo gudbinta barta internetka waxa ay dadka fursad u siineysaa in ay la socdaan halka uu marayo codsigooda, iyada oo ogeysiisyada USCIS ugu soo diri karaan barta internetka. Waxaa aad codsiga magangelyo doonka ku soo gudbin kartaa haddii aad ku sugan tahay gudaha Mareykanka.
- Si aad u codsato Aqoonsiyada Ogolaashaha Shaqada (AED), taasoo ku saleysan codsiga magangelyo doonka ah ee aan go'aan laga gaarin sida uu dhigayo sharciga (c)(8) ee shuruudaha, waxa aad soo gudbin kartaa Foomka I-765 ka dib marka aad soo gudbis codsiga magangelyo doonka.

Macluumaadka dadka dhawaanta yimid: Foomka is diiwaan gelinta iyo isbedelka cinwaanka ee ICE iyo ISAP

- Waxaa jira hay'ado kala duwan oo qaabilsan arrimaha socdaalka iyo hijrada ee dawladda mareykanka. Hay'adda Socdaalka iyo Dhaqangelinta Sharciyada Socdaalka (ICE) waa hay'adda qaabilsan fulinta sharciyada, iyo Barnaamijka Kor Kala Socoshada Degdegga ah (ISAP), waa magaca barnaamijka ICE ee la socoshada dadka soo haajira.
- Dadka qaar ayaa laga doonayaa in ay la xiriiraan ICE ama ISAP taasoo qeyb ka ah dacwadooda. Haddii aad Mareykanka ku soo gashay adiga oo ka soo talaabatay xuduudda ka dibna lagu xiray, ama lagu xiray xilli ka mid ah marka aad soo gashay Mareykanka, waxaa suurogal ah in lagaa doonayo in aad iska diiwaan geliso ICE ama ISAP.
- Macluumaad dheeraad oo ku saabsan nidaamka is diiwaan gelinta, soo booqo:
 - help.asylumadvocacy.org/faqs-ice-isap (English)
 - apoyodeasilo.org/preguntas-frecuentes-ice-isap (Spanish)
- Haddii ay dacwad kaaga furan tahay Maxkamadda socdaalka, waa in aad cinwaankaaga la socodsiisaa ICE iyo maxkamadda.
 - Si aad cinwaankaaga aad bedeshay uga diiwaan geliso maxkamadda, waa in aad soo gudbisaa Foomka EOIR-33/IC, oo aad ka heli karto Maxkamadda Socdaalka ee degaanka iyo barta internetka ee justice.gov/eoir/formslist.htm. Waa in aad gaarsiisaa 5 cisho gudahood laga bilaabo maalinta aad u guurto cinwaanka cusub.
 - Macluumaad dheeraad ah, akhri:
 - ice.gov/doclib/detention/checkin/changeAddress-en.pdf (English)
 - ice.gov/doclib/detention/checkin/changeAddress-es.pdf (Spanish)
- Haddii ay dacwad kaaga furan tahay Waaxda Adeegga Socdaalka iyo Dhalashada ee Mareykanka (USCIS), waa in aad USCIS u gudbisaa cinwaanka aad degan tahay si loo xaqiijiyo in warqadaha ay kuu soo diraan ku soo gaaraan oo dib u dhac ku imaanin dacwadaada. Macluumaad dheeraad ah, soo booqo uscis.gov/addresschange.





Talaabo Laga Qaado oo Dib Loo Dhigay Dadka Caruurninada ku Yimaada Mareykanka (DACA)

- 5Tii Oktoobar 2022 Maxkamadda racfaanka ee Louisiana ayaa go'aan ku gaartay in DACA uusan hayen barnaamij sharciga waafaqsan marka la eego sida iminka loo dhaqan geliyey. Maxkamadda racfaanku waxa ay dacwadda dib ugu soo celisay Maxkamadda Degmada ee Texas si ay u tixgeliso sharciyada Maamulka Biden ee DACA 2022, kaasoo la filayo inuu dhaqan galo 31ka Oktoobar 2022.
- Dacwad ayaa socota, sidaa darteed waxaa suurto gal ah in isbeddello dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka.
- Inta ka horeysa DHS waxa ay qabaneyso oo ka shaqeyneysaa codsiyada cusbooneysiinta DACA (oo ay ka mid yihiin codsiyada ogolaashaha shaqada iyo kor kala socoshada). DHS ma qabaneyso mana ka shaqeyneyso codsiyada DACA ee ugu horeeya.
 - Haddii hadda aad haysato DACA, sharcigaaga weli waa ansax.
 - Haddii DACA -gaagu dhowaan uu dhoco, hadda cusboonaysii!
 - Haddii aad markii ugu horeysay u gudbisay USCIS codsi DACA ah oo aan weli la aqbalin, codsigaas waa la joojin doonaa. La ma socod siin doono ilaa ogeysiis dambe.
- Shakhsiyaadka hore u helay Talaabada dib-loo-dhigay ee Timaanshiyaha Caruurnimada (DACA) hadda waxay buuxin karaan foomamka I-821D (codsiga cusboonaysiinta DACA) iyo I-765 (codsiga cusboonaysiinta oggolaanshaha shaqada) ee qatka internetka.
 - Awooddan waxaa loogu talagalay kuwa hadda ku jooga ama haysta DACA ama DACA koodu dhacay wax ka yar sannad ka hor.
 - Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo cusboonaysiiyo DACA qatka internetka: uscis.gov/humanitarian/renew-your-daca

Xaaladda Ku Meel Gaarka Ah Ee Sharcigu Ilaaliyey (TPS) iyo Dib U Dhigista Ka Saaridda Waddanka (DED)

- Waxaa laga yaabaa in dawladda Mareykanku ay wadamada qaarkood u ogolaato TPS, haddii xaalado gaar ah dartood, sidaas dagaalo ka socda ama dhibaatooyin dabiici ah, taasoo aysan suurogal aheyn in ay wadankooda dib ugu noqdaan.
- Mudada ay xaaladaas ku jiraan, dadka codsada oo loo ogolaado TPS:
 - Waxaa laga badbaadiyaa in waddanka laga saaro.
 - Waxa ay heli karaan ogolaashaha shaqada iyo lambarka bulshada
 - Waxaa suurogal ah in loo ogolaado in ay safri karaan
 - Ma soo xiri karaan DHS sharciga uu waddanka ku joogo dartiis
- TPS waa xaalad ku meel gaar ah oo aan keeni karin deganaasho rasmi ah. Hase yeeshee, dadka heysta TPS waxa ay codsan karaan waxyaabaha faa'iidada ah ee socdaalku bixiyo ama dadka aan sharciga waddanka ku aheyn xaq u leeyihiin.
- Wadamada xilligan loo ogolaaday TPS waa:
 - Afghanistan, Burma (Myanmar), Cameroon, El Salvador, Ethiopia, Haiti, Honduras, Nepal, Nicaragua, Somalia, Sudan, South Sudan, Syria, Ukraine, Venezuela, Yemen
- Macluumaad waddan kasta ku saabsan, shuruudaha ku xiran, mudada is diiwaan gelinta, iyo xogtii u damebysay, halkan ka hubi uscis.gov/TPS.
- Dhammaan codsadayasha TPS waxay hadda buuxin karaan Foomka I-821, Codsiga Xaaladda Ilaalisan ee Ku Meel Gaarka ah, onlayn at uscis.gov/i-821.
- 30Kii Diseembar 2022, DHS waxa ay ku dhawaaqday muddo u kordhin iyo dib u eegis dadka u dhashay Yemen ee TPS ku jooga muddo 18 bilood ah oo ka bilaabata 4ta Maarso 2023 ilaa 3da Siteembar 2024.
- 12 Janaayo 2023, DHS waxa ay ku dhawaaqday muddo u kordhin iyo dib u eegis dadka u dhashay Soomaaliya ee TPS ku jooga muddo 18 bilood ah oo ka bilaabata 18ka Maarso 2023 ilaa 17ka Siteembar 2024.



U Ogolaashaha sharciga shaqada ee dadka ka soo jeeda Afganistaan iyo Ukrain

- Laga bilaabo 21ka Nofeembar 2022 qaar ka mid ah dadka ka soo baxsada Ukrain iyo Afganistaan iyo qoysaskooda, ayaa loo ogolaanayaa in ay ka shaqeyn karaan Mareykanka haddii ay soo galaan waddanka. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aan loo baahneyn in aad sugto ogolaashaha USCIS ay ogolaadaan Foomka I-765 ee Ogolaashaha Shaqada, ka hor inta aanay ka shaqeyn Mareykanka.
- Dadka ka soo baxa shuruudaha waxa ay u baahan yihiin oo kaliya Form I-94 si ay u xaqiijiyaan ogolaashaha shaqada. 90 maalmood ka dib, waxaa laga doonayaa in ay goobta shaqada u soo gudbiyaan EAD (ogolaashaha shaqada), laakiin lacagta Foomka I-765 waa laga dhaafayaa.
- Faahfaahin dheeraad ah, soo booqo uscis.gov/newsroom/alerts/certain-afghan-and-ukrainian-parolees-are-employment-authorized-incident-to-parole.

Midnimada Yukreeniyaanka

- Taariikhdu markay ahayd 21ka bisha Abriil, 2022, Madaxweyne Biden waxa uu ku dhawaaqay barnaamij lagu soo dhawaynayo dadka reer Yukreeniyaanka ee ka soo cararaya duulaanka Ruushka. Midnimada Yukreeniyaanka waxay u fidinaysaa waddo muwaadiniinta Yukreeniyaanka ah iyo xubnaha qoyskooda ee ka baxsan Mareykanka inay yimaadaan Mareykanka oo ay si ku meel gaar ah u joogaan muddo laba sano ah oo sii-daynta sharafeed ah.
- Yukreeniyaanka ka qaybgalaya Midaynta Yukreeniyaanka waa inay ku lahaadaan taageere gudaha Maraykanka oo ogolaada inuu siiyo taageero dhaqaale inta ay joogaan.
- Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka iyo habka codsiga, eeg bogga DHS: dhs.gov/ukraine

Ilaha loogu talagalay qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira

- Laga bilaabo 1da Oktoobar 2022, maamulka Biden waxa uu joojiyey in sababo xagga bini'aadnimada darteed loo ogolaado in dadka u dhashay Afganistaan loo ogolaado Mareykanka waxaase ay xoogga saarayaan in dib loo dajiyo qaxootiga Afganistaan taasoo siineysa deganaasho rasmi ah.
- 22kii Nofeembar waxa ay USCIS ku dhawaaqday in ay kordhineysa mudada lacagta laga deynayo laguna dadajinayo codsiyada qaar ka mid ah dadka u dhashay degmada Afganistaan ilaa Siteembar 30, 2023.
- Ilaha Dowladda Federaalka:
 - Hagidda dadweynaha USCIS ee loogu talagalay reer Afgaanistaan: uscis.gov/humanitarian/information-for-afghans
 - “Macluumaadka Shaqada ee Ku Saabsan Dadka Haysta Fiisaha Gaarka Ah ee Muhaajirka Reer Afgaanistaan iyo La Sii-daayeyaasha” ee ah Afka Ingiriisiga, Dari, iyo Pashto: justice.gov/crt/worker-information
 - Ilaha Kaalmada Reer Afgaanistaan ee dhammaan dawladda dhexe oo uu soo diyaariyay Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga: acf.hhs.gov/orr/programs/refugees/afghan-assistance-resources
- Ilaha dib-u-dejinta:
 - Gobolka New York – I-ARC Mashruuca Dib-u-dejinta Afgaanistaan: immigrantarc.org/afghanistan
 - Magaalada New York – oo ay ku jirto khariidadda adeegyada magaalada ee lagu heli karo Dari iyo Pashto: nyc.gov/afghanistanresources
 - Galbeedka New York – Buffalo United oo loogu talagalay Daadguraynta reer Afgaanistaan: wnyrac.org
 - Albany/Caasimada gobolka – Liiska Ilaha: bit.ly/3kvWRZd
 - Deegaanka Ithaca/Finger Lakes – Liiska Ilaha Cornell Afghanistan: bit.ly/3CwfFxy
- Foomka Xog Ururinta Kowaad ee Xuquuqda Aadanaha ee lagu ogaanayo dadka u baahan in laga soo daadgureeyo Afgaanistaan: humanrightsfirst.org/afghan-evacuation

Waxbarashadda

Balanqaadka NYC ee gargaarka heynta caruurta

- Janaayo 2023, waxa ay Magaalada New York bilowday barnaamij cusub oo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee aan laheyn sharciga wadanka ama aan heysan dhalashada ay ka heli karaan adeegga heynta caruurta, kuwaas oo aan markii hore loo ogoleyn sharci la'aanta darteed.
- Barnaamijkan waxaa gargaar ka helaya ugu yaraan 600 caruur ah inta u dhaxeyso Janaayo - Juun 2023.
 - Waxaa laga yaabaa in ay qoysasku ka soo baxeen shuruudaha haddii ay:
 - Aysan ka soo bixin shuruudaha barnaamijyada kale ee bixiya kharashka heynta caruurta.
 - Heystaan caruur da'doodu u dhaxeyso 0-13
 - Dakhliga guud ee qoysku ka hooseeye 300% heerka qiyaasta faqriga ee dawladda dhexe
- Qoysaska waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay u codsadaan sida ugu dhakhsaha badan iyaga oo u sii maraya hay'adaha bulshada ee loo xilsaaray:
 - Bronx iyo Manhattan: Northern Manhattan Improvement Corporation ([212-822-8300](tel:212-822-8300), nmic.org/promisenyc)
 - Brooklyn: Center for Family Life ([718-438-9500](tel:718-438-9500), centerforfamilylife.org)
 - Staten Island: La Colmena ([718-442-7700](tel:718-442-7700), lacolmenanyc.org)
 - Queens: Chinese-American Planning Council ([718-358-8899](tel:718-358-8899), cpc-nyc.org)



Sannad Dugsiyeedka 2021–22

- NYSED iyo Golaha Maamulka Tacliinta (Board of Regents) ay ansixiyay ka-dhaafitaannada COVID-19 imtixaanada Gobolka gudihii Juun 2020, Ogat 2020, Janawari 2021, Juun 2021, Ogast 2021 iyo Janawari 2022. Haddii ardaygu helo ka-dhaafitaanka imtixaanka COVID-19, loogama baahna inay qaataan/dib u qaataan imtixaankaas si ay u qalin-jabiyaan. Markan la joogo, ma jiraan ka-dhaafid COVID-19 oo loo ansixiyay imtixaanada Juun 2022 ama Ogost 2022.
 - Inaad hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ka-dhaafitaannada COVID-19, eeg U-doodayaasha Caruurta “Summary of Changes to Graduation Requirements due to COVID-19” (Sookoobka Isbeddellada Shuruudaha Qalin-jabinta ee ay sabab u tahay COVID-19).
 - Si aad faahfaahin dheeraad uga hesho arrimaha ku saabsan Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhan (Regents exam), fiiri U doodayaasha loogu talagalay “Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhanv
 - Macluumaad ayaa lagu heli karaa luqado badan halkan advocatesforchildren.org/get_help/guides_and_resources/transition

Kaalmada Dhaqaale ee Kulliyada iyo Xeerka NYS DREAM

- Ma u baahan tahay lacag kulliyad? Talaabadaada ugu horeysa waa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Dawlada Dhexe ee Kaalmada Ardayda (Free Application for Federal Student Aid) (FAFSA). Hadda waa waqtigii la bilaabi lahaa: lacagta federaalka iyo dawlad-goboleedka ayaa marka hore timid, marka hore la adeego. Ka codso studentaid.gov/FAFSA.
- Si aad caawinaad uga hesho UnderstandingFAFSA.org, nog internetka ah oo aad ka heli karto tilmaan guud iyo goobaha ay ganacsiin ka heli karaan ardayda iyo qoysaska doonaya lacagta waxbarashada.
 - Talo siinta lacag la'aanta ah ee FAFSA ee Gargaarka Maaliyadda ee Ardayda oo ku qoran ilaa 10 luqadood.
 - Bogga waxaa ku jira sida ardayda iyo qoysaska qaxootiga ah ee aan sharci ku laheyn waddanka.
- Senatoore José Peralta Sharciga Gobolka New York wuxuu ardayda aan sharciga aan haysan iyo ardayda kaleba wuxuu siinayaa inay helaan deeqaha ay NYS maamusho iyo deeqaha waxbarasho ee kaabaya qarashkooda tacliinta sare.
 - Dhammaan wixii xog ah ama sida loo codsado, booqo hesc.ny.gov/dream

Dimuqraadiyada

Si aad uga ogaato xog dheeraad ah iyo doorashada aasaasiga iyo sida ay u shaqeeyaan, daawo fiidyooowga:

- **Af Ingiriisi:** youtu.be/-F-xuJ04NpI
- **Af Isbaanish:** youtu.be/kkaEnG1k-pY

Doorashada horudhaca ah: 27 Juun 2023

- Maalinta ugu dambeysa ee is diiwaan gelinta cod dhiibashada doorashada horudhaca ah ama aad ku bedeli karto cinwaankaaga waa 17 juun 2023.
- Si aad uga qeyb qaadata doorashada horudhaca ah ee Gobolka New York waa in aad ka diiwaan gashan tahay xisbiga qabanaya doorashada.
 - addii aadan xisbi raacsaneyn oo aad dooneyso in aad mid iska diiwaangeliso, ama aad dooneyso in aad iska bedesho xisbiga, waa in aad buuxisaa foom cusub oo is diiwaan gelin si aad isbedelka ugu cadeyso.
 - Taariikhda kama dambeysta ee is diiwaan gelinta bedeslashada xisbiga ee doorashada horudhaca ah 2023 waa 14ka Febraayo 2023.
- Si aad u aragto is diiwaan gelinta cod dhiibashada, soo booqo voterlookup.elections.ny.gov.
 - Haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan is diiwaan gelinta, la xiriir Gudiga Doorashada ee degmada: www.elections.ny.gov/CountyBoards.html
 - Dadka reer NYC: booqo vote.nyc



Isku diiwaangeli si aad u codayso

- Waad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso haddii aad tahay da'da 16+, muwaaddin Maraykan iyo deggane NY ugu yaraan 30 maalmood kahor doorashada.
 - Haddii aad tahay da'da 16 ama 17 jir, hore ayaad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso laakiin ma codayn kartid ilaa aad noqonayos da'da 18.
 - Iskuma diiwaangelin kartid inaad codayso haddii aad xabsi ugu jirto dambi lagugu xukumay ama ay xaakin maxkamad u gartay in aadan maskax ahaan karin arrintaas.
- Guddida Doorashooyinka NYS: www.elections.ny.gov/VotingRegister.html
- Guddida Doorashooyinka NYC: vote.nyc/page/register-vote
- Iska diiwaangeli onlayn (haddii aad haysato Ruqsada Darawalka NYS, Oggolaan ama Aqoonsi Aan Darawal ahayn): voterreg.dmv.ny.gov/MotorVoter
- Ku weyddiiso telefoon ahaan is diiwaangelin foom waraaq ah (oo lagu heli karo Ingiriisi ama Isbaanish): 1-800-FOR-VOTE (1-800-367-8683)
- Ma hubtid miyaa inaad u diiwaangashan tahay inaad codayso? Ka hubi heerkaaga isdiwaangelinta codbixiyaha barta voterlookup.elections.ny.gov

Magaaladeena Codaynteena (Magaalada New York City)

- Bisha Juun ee 2022, Qaali ka tirsan Maxkamadda Sare ee Richmond ayaa hor istaagay sharciga 11-2022 ee loo yaqaan Sharciga Cod Dhiibasheeda ee Magaaladeena, kaasoo u ogolaanaya cod dhiibashada ilaa 1 milyan oo dadka degan Magaalada New York ah ee doorashada dawlada hoose ee 2023.
- Magaaldu waxa ay racfaan ka qaadatay go'aanka qaaliga, sharcigu waa mid gorgortan ku jira, iyada oo la joojiyey dhaqan gelinta sharciga.

Dhaqaalaha ^{1/2}




Xareynta Canshuurta ee 2023

- Waxaa biilowday xiligii xareynta canshuurta ee 2023 IRS waxa ay qabanaysaa oo ay ka shaqeyneysaa cashuurtii 2022 taariikhda ugu dambeysana waa Talaado, 18 Abriil 2023.
- Isbedelka muhimka ee 2022:
 - Qaar ka mid ah canshuur dhaafka oo la kordhiyey 2021 waxa ay dib ugu noqonayaan heeerkaa ay ahaayeen 2019. Taasi waxa ay ka dhigan canshuur bixiyayaasha ay khuseyso ay u soo noqoneyso lacag ka yar marka lala barbardhigo sanadkii hore. Isbedelkaas waxaa ka mid ah Canshuur Dhaafka Caruurta (CTC), Canshuur Dhaafka Dakhliga soo gala qofka (EITC), iyo Dakhliga Daryeelka Caruurta iyo Qof Kula Nool.
 - Dadkii ay u soo noqotay \$3,600 ilmo kasta sanadkii 2021 ee CTC, haddii ay shuruudaha ka soo baxaan waxaa u soo noqonaya \$2,000 sanadka 2022.
 - Marka la eego EITC, dadka ka soo baxa shuruudaha ee laheyn caruur waxaa u soo noqday \$1,500 sanadkii 2021 halka 2022 tirada ugu badan ee u soo noqneysa ay tahay \$560.
 - Canshuur dhaafka Caruurta iyo qof kula nool waxa ay noqoneysaa ugu badnaan \$2,100 halkii ay aheyd \$8,000 sanadkii 2021.
 - Si ka duwan 2020 iyo 2021, ma jirin wax lacag oo ah oo kabitaan ah oo la bixiyey 2022 sidaa darteed lama filayo in lacag dheeraad ah lagu helo.
 - Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saameynta isbedelkan ku yeelanayo canshuurta aad xareyneyso, soo booqo irs.gov/newsroom/important-tax-alerts-and-news
- Ma dooneysaa in lagaa caawiyo xareynta canshuurta?
 - Waxa aad gargaarka xareynta canshuurta oo lacag la'aan ah aad ka heli kartaa qof mudatawac ah oo heysta shahaadada IRS oo ka socda Volunteer Income Tax Assistance (VITA), Tax Counseling for the Elderly (TCE), iyo Tax-Aide programs.
 - Adeeggan waxaa loo fidiyaa oo kaliya dadka dakhligoodu ka hooseeyo \$60,000 ama ka yar, da'doodu tahay 60 jir ama ka weyn, ama naafo ah ama aan si wanaagsan ugu hadal afka Ingiriisiga.
 - Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarunta kuugu dhow, soo booqo irs.gov/VITA
 - Waxa aad kula xiriiri kartaa qof mutadawac oo heysa shahaadada IRS oo canshuurta kuu xareeya adiga oo ka codsada GetYourRefund.org
 - Adeegga waa mid lacag la'aan loogu qabto dadka dakhligoodu ka yar yahay \$66,000 ama aad ku wanaagsan tahay isticmaalka kombiyuutarada.
 - Waxa aad canshuurtaada ugu gudbin kartaa IRS iyada oo lacag la'aan ah irs.gov/freefile
 - Haddii uu dakhligaaga yahay ama ka yar yahay \$73,000, waxa aad akhrisan kartaa gargaarka cuntada ee xareynta cuntada.
- Xareynta Canshuurta Lambarka Aqoonsiga ee Canshuurta
 - ITIN waxaa codsan kara dadka doonaya lambarka aqoonsiga ee xareynta canshuurta laakiin aan laheyn ama aan ka soo bixin shuruudaha lagu bixiyo lambarka bulshada (SSN). Lahaashaha ITIN waxa ay qofka fursad u siineysaa inuu xareyn karo canshuur oo heli karo canshuur dhaaf haddii uu ka soo baxo shuruudaha.
 - Si xog dheeraad ah uga ogaato sida loo codsado, canshuur dhaafka aad xaq u yeelan karto, iyo waxyaabaha kale ee ITIN la xiriira, soo boqo taxoutreach.org/tax-filing/itin
- Iska ilaali been abuurka! Marna IRS kuuma soo direyso fariin qoraal ah, iimeyl ama kaalama soo xiriireyso baraha bulshada iyaga oo ku weydiisanaya macluumaadkaaga shaqsiga ah iyo kan maaliyadda.
 - Halkan kala soco been abuurkii ugu dambeeyey ee lagu sameeyey canshuuraha iyo sida lagu aqoonsado oo loo soo sheego been abuurka irs.gov/alerts

Dhaqaalaha ^{2/2}

Kordhinta lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo

- Laga bilaabo 1da Oktoobar 2022 lacagta ugu yar ee ay ku aahqeeyaan dadka guryaha dadka ku caawiya waxaa la gaarsiiyey \$17.00 saacaddii ee Magaalada New York, Long Island, iyo Westchester, iyo \$15.20 saacaddii ee Gobolka New York State intiisa kale.
- Laga bilaabo 31ka Diseembar 2022, lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo goobaha ka baxsan Magaalada New York, Long Island, iyo Westchester waxaa la gaarsiiyey \$14.20 saacadii.
- Dulmar guud oo ku saabsan sharciyada Lacagta Ugu Yar ee Lagu Shaqeeyo New York, soo booqo dol.ny.gov/minimum-wage-0



Barnaamijka Canshuur Dhaafka ee Kharashka Dhismayaasha ee COVID-19

- Barnaamijka Canshuur Dhaafka Hantida ee COVID-19 waxa uu gargaar maaliyadeed u fidiyaa ganacsatada yaryar ee NYS taasoo ah kharashka la xiriira hawlgalka cudurka faafa, taasoo ay ka mid tahay wax ka bedelka dhismayaasha iyo dhameystirka dhismayaasha ee waxyaabaha la xiriira caafimaadka.
- Barnaamijka waa mid u furan ganacsatada yaryar ee ka hawlgala NYC oo leh ilaa 100 shaqaale ah ama ka yar oo dakhligooda guud uu ka hooseeyo \$2.5 milyan. Goobta ganacsiga waa in ay ku bixisay \$2,000 kharashka la ogol yahay mudadii u dhaxeysay 1 Janaayo 2021 iyo 31 Diseembar 2022.
- Ganacsatada yaryar waxaa loo ogol yahay canshuur dhaaf ilaa 50% ah ee kharashka la ogol yahay ugu badnaan \$25,000 taasoo ku saleysan kharashka la ogol yahay oo gaaraya ee \$50,000.
- Macluumaad dheeraad ah iyo sida loo codsado, soo booqo esd.ny.gov/covid-19-capital-costs-tax-credit

Barnaamijka Deeqda ee Miraha ee Gobolka New York

- Barnaamijka Deeqda ee Miraha ee Gobolka New York waxa uu gargaar u fidiyaa ganacsatada ku jira marxaladda bilowga ah si ay ugu guueystaan in ay qeyb ka noqdaan dhaqaalaha soo kabanaya ee New York.
- Lacagta deeqda waxaay u dhaxeysaa \$5,000 ilaa \$25,000.
- Shuruudaha:
 - In aad ka mid tahay ganacsatada yaryar, ama aad tahay mid aan faa'iido doon aheyn oo dhaqanka ama farshaxanka ah, oo ay ka mid yihiin qabdaraaslayaasha madaxa banaan ee farshaxanka.
 - Bilaabay ganacsiga 1da Siteembar 2018 ama ka dib ama kujiray ganacsiga lix bilood ka hor inta aadan soo gudbin codsiga.
 - Halkii ganacsi ooleh EIN ama SSN waxaa loo ogol yahay hal deeq.
 - Haddii aadan ka soo bixin shuruudaha gargaarka dhaqaale ee COVID-19 ee New York ee Barnaamijka ka Soo Kabashada Ganacsatada Yaryar.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha, waxyaabaha la isaga baahan yahay, iyo qiimaha ku kacaya, iyo sida loo codsado, soo booqo nyseedgrant.com. Waxaa aad heli kartaan gargaar xagga codsiga ah oo ku qoran luqado kala duwan.

Fursadaha Taageerada Dhaqaale ee Ganacsiga yaryar ee NYC

- Fursadaha Taageerada Dhaqaale ee Ganacsiga Yaryar ee NYC waa mid soo jiidasho leh, dulsaarkiisu yar yahay oo aad ka heleysaan adeeg lagu taageerayo ganacsatada yaryar iyo dadka la yimaada hal abuurka shanta qeybood ee magaalada.
 - Ma jiro heer u go'an ee sumcadda deyn bixinta oo ku xiran
 - Deyn gaareysa ilaa \$250,000 oo dulsaarkeedu yahay 4%
 - Gargaar xagga ganacsiga oo ay ka helaan deyn bixiye lagu kalsoon yahay oo degaanka ah
 - Si fudud loo codsan karo
 - Codsiga lacag kuma xirna
 - U furan dhamaan ganacsiga oo dhan – laga bilaabo kuwo bilowga ah ilaa kuwa doonaya in ay balaariyaan ganacsiga
- Macluumaad dheeraad ah oo sida loo codsado, soo booqo sbsopportunityfund.nyc

Garo Xuquuqdaada



Xubnaha bulshada iyo xulafada waa inay ka feejignaadaan xuquuqdooda mar kasta oo ay la macaamilayaan Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastam (ICE), Ilaalada Xuduudaha, ama sharci fulinta kale.

Haddii ay ku joojiyaan laanta socdaalka ama sharci fulinta kale ay ku joojiyaan, xusuusnow:

- Isdeji. Ha ka ordin. Ha iska caabin ama ha hor istaagin sarkaalka.
- Been ha sheegin, hana tusin dukumeenti been abuur ah.
- Waxaad xaq u leedahay in aad diido. Wax kasta oo aad tiraahdo waa laguu adeegsan karaa.
- Haddii wakiilku ku weydiiyo inay ku baari karaan adiga ama alaabtaada, waxaad xaq u leedahay inaad tiraahdo maya.
 - Si kastaba ha noqotee, jir ahaan iskama caabin kartid.
 - Booliisku waxa laga yaabaa inay jirkaaga baaraan haddii ay hub ka shakiyaan.
- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah oo wakiilka socdaalka uu ku codsado sharcigaaga socdaalka, waa inaad tustaa haddii aad wadato.
- Haddii lagu joojiyo, lagu xiro, ama lagu dhibaateeyo sharci fulinta, isku day inaad hesho wakiilka(yada) magaca, lambarka, iyo macluumaad kasta oo lagu aqoonsan karo.
- Adiga ama qof kale oo bulshada ka tirsan sharci fuliyaha waxa aad qaadi kartaan fiidiyow ama cod duube ah waraysiga isdhexgalkiisa. Sidoo kale waxaad qori kartaa wixii dhacay ka dib markay baxaan.
- Waa sharci darro in saraakiisha sharci fulinta ay sameeyaan joogsi kasta, baaritaan, xarig, ama masaafurinta ku saleysan midabkaaga, asalkaaga, diintaada, jinsigaaga, ama qowmiyaddaada.

Waxaad u sheegi kartaa isdhexgalka wakiilada federaalka Mashruuca Difaaca Soogalootiga (Immigrant Defense Project (IDP)).

IDP sidoo kale waxay siisaa macluumaad sharci ah iyo u gudbinta muhaajiriinta la xiray, tigidhada laga jaray, ama lagu helay dambi. Wac [212-725-6422](tel:212-725-6422) ama iimayl u dir info@immdefense.org.

Goobaha Gaarka ah

- Gurigaaga iyo "goobaha gaarka ah" (sida meelaha shaqaalaha-kaliya loogu talagalay ee goobta shaqada) waxay wataan ilaalin gaar ah oo goobaha dadweynuhu aanay samayn. Saraakiishu waxay geli karaan oo keliya meelaha gaarka ah haddii ay oggolaanshahaaga helaan ama ay ku tusaan waaran garsoor (uu saxeexay garsoore).

Goobaha la Ilaaliyo

- 27ka bisha Oktoobar, 2021, Waaxda Amniga Gudaha (Department of Homeland Security) waxay soo saartay siyaasad cusub oo xaddidaysa tallaabooyinka dhaqangelinta ICE iyo CBP gudaha ama ku dhow "meelaha la ilaaliyo."
- Tusaalooyinka meelaha la ilaaliyo waxaa ka mid ah, balse kuma koobna oo kaliya: dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarashada ama munaasabadaha, xarumaha daryeelka caafimaadka, goobaha cibaadada, meelaha ay carruurto isugu yimaadaan, goobaha adeegyada bulshada, xarumaha musiibada ama xaaladaha degdegga ah, xafladaha sida aroosyada iyo aaska, iyo bannaanbaxyada dadweynaha sida dhoolatusyada iyo isu soo baxyada.
- Gobolka New York, wakiilada socdaalka federaalku kama soo xiri karaan dadka, ama aadaya ama ka baxaya, gobolka, magaalada, iyo guryaha maxkamadaha dawlada hoose, amar maxkamadeed la'aanteed.

Ka digtoonow khiyaanada socdaalka

- Waa inaad kaliya la hadashaa qareen ama Waaxda Caddaaladda (DOJ) wakiil la aqoonsan yahay si uu talo sharci ugu helo xaaladdaada.
- Weligaa caawimaad ha ka qaadan socdaal "notario", wakiilka socdaalka, diyaariyaha cashuuraha, foomamka diyaariya, ama nootaayo. Gudaha Maraykanka, "notario" qareen ma aha!

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kiiskaaga ama aad qabto wax su'aalo ah ee socdaalka guud, wac khadka tooska ah ee Xafiiska Maraykanka Cusub [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636).

Dembiyada Nacaybka ah

Bilahii u dambeeyay, waxaa jiray warbixino sii kordhayay ee dembiyada nacaybka ku lidka ah xubnaha bulshadda muhaajirka.

Waa maxay dembiga nacaybku?

- Dembiga nacaybka waa demb ay dhiirigeliso eexdu.
- Qofku waxa uu galaa dembiga nacaybka marka mid ka mid ah dembiyada ka caddeeyay la galo ee beegsanaya dhibanaha sababtoo ah fikirka ama rumayn ku saabsan isirka, midabka, asalka qaranka, tafiirta, sinjiga, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, naafanimada ama qaabka galmada, ama marka falkan loo galo iyaddoo ay keentay nooca fikirka la qaba ama waxa laga aaminsan yahay qofka.
- Badhasaab Cuomo waxa uu sameeyay Kooxda hawlgalka Degdega ah ee Dembiyada Nacaynka si ay ula dagaalamaan warbixinaha kordhaya ee eexda oo ay dhiirigeliso hanjabaado, dhibaataayn iyo rabshad ka dhacda Gobolka New York oo dhan.
- Marka laga warbixiyo dembiga nacaybka, dhammaan macluumaadka ku saabsan waayo aragnimadaada, aqoonsiga, iyo waxa kale waxay ahaadaan qarsoodi.

Haddii aad aragto shay ama aad tahay dhibaha dembiga nacaybka, uga warbixi booliska oo soowac Qaybta Xuquuqda Aadamaha ee NYS. Soo wac **1-888-392-3644 ama Fariin qoraal ah ugu dir “HATE” lambarka **81336**.**

Haddii adiga ama qof aad garanayso uu ahaa dhibanah dembiga, Xafiiska NYS ee Adeegyada Dhibanaha waxa uu awoodi karaa inuu kaa caawiyo biilashada caafimaadka iyo la talinta kharashyada, aaska iyo kharashyada geerida aaskeeda, mushaharka lumay, iyo noocyada kale ee caawimada. Soo wac **1-800-247-8035 ama booqo **ovs.ny.gov**.**

Dadka degen NYC iyo wadamada ku xeeran

Gudaha NYC:

- Qareenka dad waynaha
 - [212-669-7250](tel:212-669-7250)
- Qareenka Degmadda Manhattan
 - [212-335-3100](tel:212-335-3100)
 - manhattanda.org/victim-resources/hate-crimes
- Qareenka Degmadda Brooklyn
 - [718-250-4949](tel:718-250-4949)
 - brooklynda.org/hate-crimes-bureau
- Qareenka Degmadda Queens
 - [718-286-6000](tel:718-286-6000)
- Guddida Xuquuqda Aadamaha NYC
 - [718-722-3131](tel:718-722-3131)
 - nyc.gov/cchr
- Aaga Badbaada ah ee Caawimada Dhibanaha
 - [1-866-689-4357](tel:1-866-689-4357)

Ka baxsan NYC:

- Qareenka Degmadda Nassau
 - [526-571-3505](tel:526-571-3505)
 - nassaуда.org
- Qareenka Degmadda Nassau, Xafiiska Arrimahaa Muhaajirka
 - [516-571-7756](tel:516-571-7756)
- Hawl fuliha Degmadda Nassau Laura Curran
 - [516-571-3131](tel:516-571-3131)
- Qareenka Degmadda Suffolk
 - [631-853-4161](tel:631-853-4161)
 - suffolkcountyny.gov/da
- Degmadda Suffolk Waaxda Booliska, Qaybta Dembiyada Nacaybka
 - [631-852-6323](tel:631-852-6323)
- Degmadda Suffolk, Waaxda Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay
 - [631-853-4738](tel:631-853-4738)
- Degmadda Westchester, Guddida Xuquuqda Aadamaha
 - [914-995-7710](tel:914-995-7710)
 - humanrights.westchestergov.com



Ilaha NYS



Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub

- Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu u baahan yahay caawimada sharciga soo wac khadka tooska ah [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636). Dhammaan macluumaadka wicitaanku waa qarsoodi. Caawimada waxaa lagu heli karaa 200+ luqaddoo.

Waaxda Caafimamadka NYS

- Macluumaadka u dambeeya ee safmarka COVID-19, soo wac khadka tooska ah [1-888-364-3065](tel:1-888-364-3065) ama booqo ny.gov/coronavirus.
- Hel xaqiiqooyinka tallaalka COVID-19 gudaha New Yorka bogga ny.gov/vaccine.
- Codso daboolida caafimamadka: soo wac [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777) ama booqo nystateofhealth.ny.gov.

Xafiiska Caafimaadka Maskaxda NYS

- FSu'aalaha dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda ama si aad u hesho adeeg bixiyaha adeega caafimaadka maskaxda, soo wac [1-800-597-8481](tel:1-800-597-8481) ama omh.ny.gov.
- Haddii aad la kullanto walbahaar uu sababo gurmada korona fayraska, soo wac [1-844-863-9314](tel:1-844-863-9314).
- Laynka Qaranka tooska ah ee Ka hortagga Isdilada: Haddii noloshaada ama qof kale noloshiisu ay khatar wayn ku sugan tahay, soo wac [911](tel:911). Haddii aad ku jirto dhib oo aad u baahan tahay caawimo degdeg ah, soo wac [1-800-273-8255](tel:1-800-273-8255) ama fariin Qoraal ah ugu soo dir "GOT5" ilaa [741-741](tel:741-741).
- Rabashada Guriga: haddii adiga ama qof kale uu xidhiidh la leeyaha uu ku maamulayo qof kale hadal, qaab dagaalansan, ama xad gudub galmo, ama farsamooyin kale, soo wac NYS Domestic Violence Hotline lambarka [1-800-942-6906](tel:1-800-942-6906).

Waaxda Shaqada NYS

- Waaxda Shaqada NYS waxaa ka go'an ilaalinta iyo sare u qaadida badbaada shaqaalaha iyo caafimamadka, mushahrka, iyo xaaladaha shaqada.
- Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan mushaharka iyo sharciyada saaada, caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ama ku soo xaree cabasho, soo wac [1-888-469-7365](tel:1-888-469-7365) ama booqo dol.ny.gov/safety-and-health
- Wixii ah caawimada Caymiska Shaqo la'aanta, wac [1-888-209-8124](tel:1-888-209-8124) ama booqo dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance.

Qaybta Xuquuqda Aadamaha NYS

- Sharciga Xuquuqda Aadamaha New York waxa uu mamnuuca takoorka dhinacyada sida shaqada, guriyaynta, amaahda, waxbarashadda, iyo meelaha hoyga dad waynaha, oo ku salaysan da'da, isirka, asalka qaranka, sinjiga, qaabka galmada, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, heerka guurka, heerka ciidaanka, iyo dabaqadaha kale.
- Haddii aad dareemayso in lagu takoroay, ku soo xaree cabashada [1-888-392-3644](tel:1-888-392-3644) ama booqo dhr.ny.gov.

Ilaha COVID-19 Magaalada New York

- Dadka degen NYC ee raadinaya adeega adeeg bixiyayaasha ama ilaha kale waxay ka heli karaan diiwaanada hoose:
 - Waxbarashadda: nyic.org/covid-education-resources
 - Shaqada: nyic.org/covid-employment-resources
 - Dhaqaalaha: nyic.org/covid-financial-resources
 - Cuntadda: nyic.org/covid-food-resources
 - Daryeelka Caafimaadka: nyic.org/covid-healthcare-resources
 - Ganacsiga yar: nyic.org/covid-small-business-resources

Dokumentiga qatka internetka ka fiiri ama luqado kale iyadoo lagu qoray, booqo nyic.org/KYR ama calaamaddan iskaangaree:



Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku saabsan agabkan ama macluumaadka ku jira, fadlan la xidhiidh:

Jennifer Diaz – jdiaz@nyic.org (NYC)

Bryan Lee – blee@nyic.org (Upstate NY)

Haddii aad dooneyso in aad qabato kulan lacag la'aan ah ee Ogsoonow Xuquuqdaada oo loo qabto kooxaha bulshada, fadlan la soo xiriir: kyr@nyic.org

Isbahaysiga Laanta Socdaalka New York (NYIC) waa xeerka dalaayad iyo urur u doodis ah ah oo metela in kabadan 200 oo muhaajiriin ah iyo kooxaha xuquuqda qaxootiga dhammaan New York.

Waxaa noo muuqda Gobolka New Yorka oo ka xoog badan sidii hor esababtoo ah dhammaan dadka waa la soo dhawaynayaa, waxaa loola dhaqmaa si xaq ah, oo waxaa la siiyaa fursada ay ku raacdeeyaan riyooinkooda. Hiigsigayagu waa inaan midayno muhaajiriinta, xubnaha, iyo gaanshaan buurta markaad dhammaan dadka reer New York way samaadaan.



New York Immigration Coalition

131 W 33rd St, Ste 610

New York, NY 10001

212 627 2227

nyic.org